## Sideen u helnaa bisha barakeysan?

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا كُتِبَ عَلَيْكُمُ الصِّيَامُ كَمَا كُتِبَ عَلَى الَّذِينَ مِنْ قَبْلِكُمْ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ}

(**Kuwa xaqa rumeeyow waxaa laydinku waajibiyay Soonka sidii loogu waajibiyay kuwii idinka horreeyay si aad u dhawrsataan**), Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa kaasoo ku yiri xadiiskiisa sharfta leh:

(مَنْ صَامَ رَمَضَانَ إِيمَانًا وَاحْتِسَابًا ، غُفِرَ لَهُ مَا تَقَدَّمَ مِنْ ذَنْبِهِ)

(**Qofkii u soomo Ramadaan iimaan iyo ajar raadis waxaa loo dhaafayaa wixii hormaray dambigiisa**)

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Intaas kaddib:

Fadliga Ilaahay – cazza wajalla – uu siiyay addoomihiisa waxaa ka mid ah inuu u sameeyay xilliyo khayre leh, barakooyinka ay si is dabajoog u yimaadaan, naxariistana ay soo degato, ajarkana laballaab uu

noqanayo, abaalkana uu weynaanayo, nabigeena wuxuu leeyahay (*naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee*):

**( إِنَّ لِرَبِّكُمْ عَزَّ وَجَلَّ فِي أَيَّامِ دَهْرِكُمْ نَفَحَاتٍ، فَتَعَرَّضُوا لَهَا ، لَعَلَّ أَحَدَكُمْ أَنْ تُصِيبَهُ مِنْهَا نَفْحَةٌ لَا يَشْقَى بَعْدَهَا أَبَدًا )**

**(Rabbigiina – cazza wajalla – wuxuu ku leeyahay maalmaha waqtigiina barakooyin ee u banbaxa, waxaa laga yaabaa midkiina inay soo gaarto barako oo kaddibna waligiisa uusan hoogi doonin**)

Xalliyada waxaa ugu sharaf badan uguna barako badan bisha Ramadaan ee barakaysan, waana bilaha midda ugu weyn uguna qiime badan, maalmaheedana waa maalmaha ugu khayrka badan uguna fadliga badan, habeennadeedana waa habeennada ugu saafinimada badan uguna daahirnimada badan

Nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu ku bishaaraysan jiray soo gelidda Ramadaan, asxaabtiisana - *raalliga Ilaahay korkooda ha ahaadee* - wuxuu ugu bishaarayn jiray siismadan rabbaaniga ah, Abuu Hureyra - *Ilaahay raalli haka noqdee* - waxaa laga wariyay Rasuulkii Alle - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - inuu yiri:

(أَتَاكُمْ رَمَضَانُ شَهْرٌ مُبَارَكٌ ، فَرَضَ اللهُ عَلَيْكُمْ صِيَامَهُ ، تُفْتَحُ فِيهِ أَبْوَابُ السَّمَاءِ ، وَتُغَلَّقُ فِيهِ أَبْوَابُ الْجَحِيمِ ، وَتُغَلُّ فِيهِ مَرَدَةُ الشَّيَاطِينِ ، لِلَّهِ فِيهِ لَيْلَةٌ خَيْرٌ مِنْ أَلْفِ شَهْرٍ ، مَنْ حُرِمَ خَيْرَهَا فَقَدْ حُرِمَ)

(**Waxaa idin yimid Ramadaan waa bil barakaysan, Ilaahay wuxuu idinku faradyeelay soonkeeda, waxaa la furayaa albaabada cirka, waxaa la xirayaa albaabada naarta, waxaa la katiinadeynayaa shayaadiinta madaxa adag, Ilaahay waxaa ugu sugnaatay habeen ka khayr badan kun bilood, qofkii khayrkiisa la seejiyo khayr buu seegay**)

Saxaabada - *raalliga Ilaahay korkooda ha ahaadee* - Allaha sarreeya waxay ka baryi jireen inuu Ramadaanka gaarsiiyo, iyo inuu ugu kaalmeeyo inay camalka ku wanaajiyaan, Ibnu Rajab - *Alle ha u naxariistee* - wuxuu leeyahay: In badan oo ka mid ah dadka suubanaa - *Alle ha u wada naxariistee* - waxay Ilaahay baryi jireen lix bilood inuu Ramadaanka gaarsiiyo, kaddibna lix bilood kale ayay Ilaahay baryi jireen inuu ka aqbalo. Wuxuu leeyahay Yaxya Bin Abii Kathiir: ducadooda waxaa ka mid ahayd: "Ilaahayow Ramadaan ii geey iina keen Ramadaan igana guddoon".

Waxaa laga wariyay Jaabir bin Cabdillaahi - *Ilaahay raalli haka wada noqdee* - Nabiga - *naxariis iyo*

*nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - inuu mimbarka fuulay markuu talaabada koowaad fuulay wuxuu yiri: "**aamiin**" kaddib talaabada labaad ayuu fuulay haddana wuxuu yiri: "**aamiin**" kaddib talaabada seddexaad ayuu fuulay haddana wuxuu yiri: "**aamin**", waxay dhaheen: waxaan maqalnay aamin adoo seddex jeer dhahay wuxuu yiri - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -: "**markaan fuulay talaabada koowaad Jabriil** - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - **ayaa ii yimid wuxuuna yiri**: "**ha hoogo addoon Ramadaan haleelay kana dhammaaday isagoon loo dhaafin dambiga, waxaan dhahay**: **aamiin** ...).

Annagoo isku diyaarinayno soo dhoweynta martidan sharafta badan - maalmo yar kaddib – waxaa lanaga rabaa inaan ku dayano rasuulkii Alle Nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - iyo asxaabtiisa sharafta badan, waa inaan ku dayanaa caibaadadooda iyo camalkooda bishan barakaysan, qofka muslinka waxaa ku habboon inuu niyaysto niyadana cusbooneysiisto, Ilaahay agtiisa – *cazza wajalla* – niyada ayaa lagu kala duwan yahay; maxaayeelay niyada waa sirta aqbalitaanka camalka, nabigeena - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu leeyahay:

(إِنَّمَا الْأَعْمَالُ بِالنِّيَّاتِ ، وَإِنَّمَا لِكُلِّ امْرِئٍ مَا نَوَى ، فَمَنْ كَانَتْ هِجْرَتُهُ إِلَى اللَّهِ وَرَسُولِهِ فَهِجْرَتُهُ إِلَى اللَّهِ وَرَسُولِهِ ، وَمَنْ كَانَتْ هِجْرَتُهُ لِدُنْيَا يُصِيبُهَا ، أَوِ امْرَأَةٍ يَتَزَوَّجُهَا ، فَهِجْرَتُهُ إِلَى مَا هَاجَرَ إِلَيْهِ)

(**Camalka wuxuu ku xiran yahay niyada, qof kastana waxaa u sugnaaday wuxuu niyaystay, qofkii hijradiisa ay ahaato xagga Alle iyo rasuulkiisa hijradiisa waa xagga Alle iyo rasuulkiisa, qofkii hjiradiisa ay noqoto adduunyo xaggeeda ama haweeney uu guursanayo wuxuu leeyahay waxa uu u hijrooday**)

(قَالَ اللهُ – عَزَّ وَجَلَّ – : كُلُّ عَمَلِ ابْنِ آدَمَ لَهُ إِلَّا الصِّيَامَ ، فَإِنَّهُ لِي وَأَنَا أَجْزِي بِهِ، وَالصِّيَامُ جُنَّةٌ ، فَإِذَا كَانَ يَوْمُ صَوْمِ أَحَدِكُمْ ، فَلَا يَرْفُثْ وَلَا يَصْخَبْ ، فَإِنْ سَابَّهُ أَحَدٌ أَوْ قَاتَلَهُ ، فَلْيَقُلْ : إِنِّي امْرُؤٌ صَائِمٌ ، وَالَّذِي نَفْسُ مُحَمَّدٍ بِيَدِهِ ، لَخُلُوفُ فَمِ الصَّائِمِ أَطْيَبُ عِنْدَ اللهِ مِنْ رِيحِ الْمِسْكِ).

Abuu Hureyra - *Ilaahay raalli haka noqdee* - ayaa yiri: rasuulkii Alle - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu yiri: ( **Alle – cazza wajalla – wuxuu yiri: Camal kaste aadanaha isagaa iska leh soonka mooyee aniga ayuu ii sugnaaday anigaana ka abaalmarinayo,**

**soonka waa gaashaan, haddii midkiina uu sooman yahay yuuna afxumo ku dhaqaaqin yuuna qaylinin haddii qof caayo ama la dagaallamo ha yiraahdo: waxaan ahay qof sooman, Allaha nafta Muxamed gacantiisa ay ku jirto ayaan ku dhaaranayaa qofka sooman urka afkiisa wuxuu Ilaahay agtiisa kaga caraf badan yahay udugga miskiga**).

Sidoo kale waxaa ku habboon qofka muslinka bisha Ramadaan inuu daacada badsado iyo camalka suuban, iyo inuu raaco wixii nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - ku dardaarmay oo uuna sameyn jiray sida dedejinta afurka dibudhigidda saxuurta wuxuu leeyahay nabigeena - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - :

**(لا تزالُ أمَّتي بخيرٍ ما عَجَّلوا الإفطارَ وأخَّروا السُّحورَ)**

(**Umaddayda kama suulayaan khayr intay afurka dedejinayaan saxuurtana dibudhigayaan**) wuxuu kaloo leeyahay - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - :

**(تَسَحّرُوا فإنّ في السّحُورِ بَرَكَةً)**

(**Saxuurta maxaayeelay saxuurashada barako ayaa ku jirto**)

Sidoo kale waxaa waajib ah inuusan qofka ku xadgudbin cuntada iyo cabbitaanka Allaha sarreeya wuxuu yiri:

{وَكُلُوا وَاشْرَبُوا وَلا تُسْرِفُوا إِنَّهُ لا يُحِبُّ الْمُسْرِفِينَ}

(**Cuna oo cabbana hana xadgudbina Illeen Ilaahay ma Jecla kuwa xadguduba**), rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu leeyahay:

(مَا مَلَأَ آدَمِيٌّ وِعَاءً شَرًّا مِنْ بَطْنٍ، بِحَسْبِ ابْنِ آدَمَ أُكُلَاتٌ يُقِمْنَ صُلْبَهُ ؛ فَإِنْ كَانَ لَا مَحَالَةَ: فَثُلُثٌ لِطَعَامِهِ ، وَثُلُثٌ لِشَرَابِهِ ، وَثُلُثٌ لِنَفَسِهِ)

(**Aadane ma buuxiyo weel ka xun caloosha, aadanaha waxaa ku filan cunto uu ku noolaanayo, haddii lagama maarmaan ay tahay ha ku kaaftoomo seddex meelood meel cuntadiisa seddex meelood meel cabbitaankiisa seddex meelood meel neeftiisa**).

Maxaa ka qurux badan inay dareemaan dadka hantida leh baahida dadka saboolka ah bishan barakaysan, Ramadaan waa bisha deeqda iyo wax bixinta iyo deeqsinimada, waa bisha wadato macnaha naxariista iyo dhimrinta iyo u turidda agoonta iyo garoobbada iyo dadka saboolka ah iyo masaakiinta si kaste wax loogu qaban karo, taas waxay sabab u noqonaysaa in laga farxiyo dadka saboolka ah iyadoo taas lagaga dayanayo rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -

xaaladahiisa oo dhan gaar ahaan Ramadaan, Ibnu Cabbaas - *Ilaahay raalli haka wada noqdee* - wuxuu yiri:

**(كَانَ رَسُولُ اللَّهِ – صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ– أَجْوَدَ النَّاسِ ، وَكَانَ أَجْوَدُ مَا يَكُونُ فِي رَمَضَانَ حِينَ يَلْقَاهُ جِبْرِيلُ ، وَكَانَ يَلْقَاهُ فِي كُلِّ لَيْلَةٍ مِنْ رَمَضَانَ فَيُدَارِسُهُ الْقُرْآنَ ، فَلَرَسُولُ اللَّهِ – صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ – أَجْوَدُ بِالخَيْرِ مِنَ الرِّيحِ المُرْسَلَةِ)**

(**Rasuulkii Alle -** *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* **- wuxuu ahaa midka dadka ugu deeqsinimada badan, wuxuu ugu deeqsinima badnaa bisha Radamaan markuu Jibriil la kulmayo, wuxuu la kulmi jiray habeen kaste ka mid ah Ramadaan wuxuu la akhrisan jiray Quraanka, Rasuulka Alle -** *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* **- wuxuu ka deeqsinimo badan yahay xagga khayrka dabeysha lasoo diray**)

Arrinkaas kuma koobna waxbixinta kaliya, waxaa loola jeedaa intaas wax ka badan, waxaa soo galaya samafalka iyo xiriirinta iyo is jacaylka iyo isu dhimrinta sidoo kale ilaalinta xuquuqda iyo waajibaadka.

Sidoo kale waxaa ku habboon qofka muslinka ah inuu ku dadaalo cibaado badan, sida akhriska Quraanka iyo fiirfiirinta macnahiisa salaadda tahajudka, Nabigeena -

*naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu leeyahay:

**(من قام رمضان إيمانًا واحتسابًا غفر له ما تقدم من ذنبه)**

**(Qofkii u istaago Ramadaan iimaan iyo ajar raadis waxaa loo dhaafayaa wixii hormaray dambigiisa**)

Wuxuu kaloo leeyahay rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - :

**(من قام ليلة القدر إيمانًا واحتسابًا غُفر له ما تقدم من ذنبه)**

(**Qofkii habeenka laylatulqadarka u istaago iimaan iyo ajar raadis waxaa loo dhaafayaa wixii hormaray dambigiisa**).

Caa'isho - *Ilaahay raalli haka noqdee* -waxaa laga wariyay inuu soo baxay rasuulkii Ilaahay - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - habeen barkii kuna tukaday masjidka, rag ayaa ku xirtay salaaddiisa, dadkii ayaa waabariistay way ku sheekaysteen, badankooda ayaa soo kulmay way la tukadeen, dadkii ayaa waabariistay way ku sheekaysteen habeenka seddexaad dadkii masjidka ayaa soo batay rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - ayaa soo baxay salaaddiisa ayay ku xirteen, habeenka afaraad masjidka ayaa deeqi waayay dadka, fajarka ayuu usoo baxay

markuu dhammeeyay salaadda subax dadka ayuu usoo jeestay wuu ashahaatay kaddib wuxuu yiri:

(أَمَّا بَعْدُ ، فَإِنَّهُ لَمْ يَخْفَ عَلَيَّ مَكَانُكُمْ ، لَكِنِّي خَشِيتُ أَنْ تُفْرَضَ عَلَيْكُمْ فَتَعْجِزُوا عَنْهَا)

(**Intaas kaddib igama qarsoona xaalkiina, laakin waxaan ka baqay in laydinku faradyeelo oo markaas aad tabar u weysaan**).

Kaddib sayidkeena Cumar - *Ilaahay raalli haka noqdee* - waqtiga uu khaliifaha ahaa wuxuu ku kulmiyay muslmiinta hal qaari oo imaam u noqonaya dadka.

Waxaa laga wariyay Cabdiraxmaan bin Cabdilqaari inuu yiri: "waxaan la aaday masjidka habeen Ramadaan ah Cumar bin Alkhaddaab - *Ilaahay raalli haka noqdee* - waaba dadka kuwo kala qaybsan qofkba goonigiisa ayuu u tukanayaa, qof ayaa jameeco dujinaya, sayidkeena Cumar - *Ilaahay raalli haka noqdee* -wuxuu yiri: waxaan u arkaa kuwan haddaan hal qaari isugu keeni lahaa way fiicnaan lahayd, kaddib wuu go'aansaday wuxuu isugu keenay sayidkeena Ubay bin Kacab - *Ilaahay raalli haka noqdee* - isagoo ku dadaalaya oogidda sunnada taraaxwiixda iyo midnimada muslimiinta.

Soonka dhabta waa in laga soomo dhammaan dambiyada iyo macsiyadaha, immisa qof sooman oo sookoodi aan ka helin gaajo iyo harraad waxan ahayn.

Rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu leeyahay:

**(رُبَّ صَائِمٍ حَظُّهُ مِنْ صِيَامِهِ الْجُوعُ وَالْعَطَشُ ، وَرُبَّ قَائِمٍ حَظُّهُ مِنْ قِيَامِهِ السَّهَرُ)**

(**Badanaa qof sooman oo soonkiisa ka helo gaajo iyo harraad, badanaa qof saalad u taagan salaaddiisa ka helo dhafar**).

Sidaas oo kale wuxuu leeyahay:

**(مَنْ لَمْ يَدَعْ قَوْلَ الزُّورِ وَالعَمَلَ بِهِ فَلَيْسَ لِلَّهِ حَاجَةٌ فِي أَنْ يَدَعَ طَعَامَهُ وَشَرَابَهُ)**

(**qofkaan iska dhaafin Hadalka beenta iyo ku dhaqankiisa Ilaahay dan kama laha inuu ka tago cuntadiisa iyo cabbitaankiisa**).

Jaabir bin Cabdillaahi – *Ilaahay raalli haka wada noqdee* – wuxuu yiri:

**(إِذَا صُمْتَ فَلْيَصُمْ سَمْعُكَ وَبَصَرُكَ وَلِسَانُكَ عَنِ الْكَذِبِ وَالْمَحَارِمِ ، وَدَعْ أَذَى الْخَادِمِ ، وَلْيَكُنْ عَلَيْكَ وَقَارٌ وَسَكِينَةٌ يَوْمَ صِيَامِكَ ، وَلَا تَجْعَلْ يَوْمَ فِطْرِكَ وَصَوْمِكَ سَوَاءً)**

(**Haddaad soonto maqalkaaga iyo araggaaga iyo carrabkaaga haka soomaan beenta iyo xaaraanta, iska dhaaf dhibidda qofka kuu adeegaya, halagaa dareemo**

**deganaan iyo xasillooni, isku mid haka dhigin maalinta aad sooman tahay  iyo maalinta aad afursan tahay**).

Ha ku dadaalo qofka muslinka soonkiisa inuu noqdo soon dhab ah siduu uga helo natiijada uu ka rajeynayo soonkiisa taasoo ah cabsida Ilaahay – *cazz wajalla* -.

Waxaa laynaga rabaa inaan ogaano bisha Ramadaan ee barakaysan inay tahay bisha dadaalka iyo kartida  iyo camalka, yuuna yaraanin dadaalkeena iyo camalkeena Ramadaan marka loo fiiriyo bilaha kale iyadoo lagu eersheeganayo daal iyo noog, dad badan ayaa u jeesto wahsi iyo caajis, waxay badsadaan hurdada Ramadaanka maalintiisa, taasoo keenaysa dadka arrimahooda inay socon waayaan bishan barakeysan, arrinkan wuxuu khilaafsan yahay ujeeddada soonka loo jideeyay oo ah cabsida Ilaahay, wuxuu yiri Allaha sarreeya:

**{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا كُتِبَ عَلَيْكُمُ الصِّيَامُ كَمَا كُتِبَ عَلَى الَّذِينَ مِن قَبْلِكُمْ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ}**

**(Kuwa xaqa rumeeyow waxaa laydinku waajibiyay Soonka sidii loogu waajibiyay kuwii idinka horreeyay si aad u dhawrsataan**).

Cabsida Ilaahay laguma kasbado wahsi iyo caajis, ee waxaa lagu kasban karaa cibaado iyo camal badan, iyo ikhaaska iyo iska ilaalinta  Alle - *cazza wajalla* -.

Haddii ay ka mid tahay iska ilaalinta Alle – *cazza wa jalla* – sifooyinka u gaarka ah qofka sooman taas waxay keenaysaa in Alle – *cazza wa jalla* – laga baqo in la oofiyo xaqa shaqada, midka ilaalinaya salaaddaada iyo soonkaaga iyo dhaafiddaada cuntada iyo cabbitaanka waa midka ilaalinaya oofintaada shaqada xaqeeda ama ka dhuumashadaada iyo ka gaabintaada shaqa xaqeeda aad ka gaabinayso.

Haddii xalaalquudashada iyo aqbalitaanka ducada ay yihiin waxa ugu muhimsan uu ku dadaalo qofka sooman waxaa laga rabaa inuu ogaado haddii uu mushaar qaato isagoon shaqadiisa gudanin inuu xaaraan cunayo, maxaayeelay waxaa laga yaabaa inuu mushaar qaato isagoon shaqada kasoo bixin, ama isagoo wax u dhimay heshiiskii iyo ballantii iyo shuruudahii shaqada, waxaa isku mid ah shaqadaas hadday tahay shaqo dowlad ama shaqo gaar ah.

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah,

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago waxaan qirayaa in

sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Walaalaha islaamka:

Shaqada iyo cibaadada waa mataan, cibaadada waa shaqo, camalka Ilaahayga sarreeya dartii loo baraxtirayna waa cibaado, midkooda kan kale kama baxsana, Alle wuxuu yiri:

:{وَقُلِ اعْمَلُواْ فَسَيَرَى اللّهُ عَمَلَكُمْ وَرَسُولُهُ وَالْمُؤْمِنُونَ وَسَتُرَدُّونَ إِلَى عَالِمِ الْغَيْبِ وَالشَّهَادَةِ فَيُنَبِّئُكُم بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ}

(**Dheh: camalfala wuu arki doonaa Alle camalkiina iyo rasuulkiisa iyo mu'miniinta, waxaana la idin celinayaa midka og waxa maqan iyo waxa jooga wuxuuna idin sheegayaa waxaad samayn jirteen**).

Qofka fiirfiirinaya siirada nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - iyo siirada asxaabtiisa sharafta badan gadaashiisa kaddib, iyo taariikhda islaamka oo dhan wuxuu ogaanayaa bisha Ramadaan inay tahay bisha shaqada iyo wax soo saarka, in badan guulaha muslimiinta waxay dhaceen bishan barakeysan, dhabtii waa bisha guulaha iyo furashada, waxaa lagu

guulaystay dagaalkii weynaa ee Badar oo ahaa dagaalkii kala saaray xaqa iyo baadilka, oo Ilaahay – *cazza wajalla* – ku karaameeyay mu'miniinta guul xaggiisa ka timid, iyagoo ka yaraa cadowgooda tirada iyo qalabkaba, Allaha sarreeya wuxuu yiri:

**{وَلَقَدْ نَصَرَكُمُ اللَّهُ بِبَدْرٍ وَأَنْتُمْ أَذِلَّةٌ فَاتَّقُوا اللَّهَ لَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ * إِذْ تَقُولُ لِلْمُؤْمِنِينَ أَلَنْ يَكْفِيَكُمْ أَنْ يُمِدَّكُمْ رَبُّكُمْ بِثَلَاثَةِ آلَافٍ مِنَ الْمَلَائِكَةِ مُنْزَلِينَ * بَلَى إِنْ تَصْبِرُوا وَتَتَّقُوا وَيَأْتُوكُمْ مِنْ فَوْرِهِمْ هَذَا يُمْدِدْكُمْ رَبُّكُمْ بِخَمْسَةِ آلَافٍ مِنَ الْمَلَائِكَةِ مُسَوِّمِينَ * وَمَا جَعَلَهُ اللَّهُ إِلَّا بُشْرَى لَكُمْ وَلِتَطْمَئِنَّ قُلُوبُكُمْ بِهِ وَمَا النَّصْرُ إِلَّا مِنْ عِنْدِ اللَّهِ الْعَزِيزِ الحكيم }**

(**Dhab ahaan buu idiin ku gargaaray Alle (maalintii) Badar idinkoo tabaryar ee ka cabsada Alle waxaadna mudan tihiin inaad ku mahdisaan * markaad ku lahayd mu'miniinta miyuusan idinku filnayn inuu idinku xoojiyo rabbigiina saddex kun oo malaa'ig ah oo soo degaya * waa na kaafiyaan ee haddaad adkeysataan oo aad Alle ka cabsataan oo ayna idiinku imaadaan degdaggooda kan ah, wuxuu idinku xoojinayaa rabbigiina shan kun oo malaa'ig ah oo calaamaysan * uma yeelin Alle (arrintaas) bishaaradiina awgeed mooyee iyo inay ku xasisho quluubtiina isaga, gargaar aan Alle agtiisa ka imaaninna ma jiro ee ah mid adag oo falsan**).

Bisha Ramadaan ayay dhacday furashada Makka taasoo ahayd furasho weyn oo Ilaahay ku xoojiyay rasuulkiisa - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - iyo mu'miniinta, kuna hoojiyay shirkiga iyo mushrikiinta, casirga cusub guusha tobanka Ramadaan lixda Aktoobar oo Ilaahay waafajiyay Masar inay kusoo ceshato dhulkeeda iyo sharfteeda, askariga masaariga halqabsigiisa wuxuu ahaa: Ilaahay baa weyn, wuxuuna intaas ku darsaday soon iyo salaad iyo duco dhab ah, waxaa la helay guul weyn xadgudbeyaashana waa la eryay, iyadoo la difaacayo diinta iyo dalka iyo dhulka iyo sharafta, wuxuu u ahaa cashar la taaban karo qof kaste naftiisa ay u qurxinayso inuu Masar kusoo xadgudbo.

Maxaa inooga habboon inaan nuxurka Ramadaanka soo ceshano dhammaan dhinac walba nolosheena si aan guul u gaarno, si aan u sugno tiirarka xaqa iyo caadaaladda, si aan u ilaalino dhulka iyo sharfta iyo karaamada, ilaa ay kasoo ceshato umaddeena muunadeeda iyo haybnadeeda umadaha iyo shucuubta kale dhexdooda, taasna ma suurtagalayso iyadoon safafka la midaynin, kalimadana hal laga dhigin, hal ujeeddana laysugu imaanin, waxaa loo baahan yahay wax badan karti iyo dadaal iyo shaqo, iyo in loo gudbiyo khayrka dadkoo dhan.

Ilaahayow noo barakeey Shacbaan, Ramadaanna na gaarsii, nagana aqabal rabbiyow adaa rabbiga caalamka ahee.